FAA'IIDOOYINKA

ADVANCED METERING

Awood badan oo Gacmahaaga ku jirta

Seattle City Light waa adeega ugu cagaaran/wanaagsan wadanka. Waxaa naga go'an inaan ku siino adeega ugu wanaagsan shirkada iyo isku halayn halka oo aan awood siinayno inaad samayso doorashooyin tamarta lagu kaydinayo. Iyadoo qayb ka ah balan qaadkan, waxaan qorshaynay inaan bilowno inaan mitirada korontada ku badalno cabirka hormarsan ee 2017.

Advanced Metering waa tiknoolajiyad amaan ah oo la xaqiijiyay taasoo si balaaran looga isticmaalo gudaha US. In kabadan 500 shirkadood gudaha wadanka ayaa hadda isticmaala tiknoolajiyadan, iyadoo 50 malyan oo cabirada horumarsan ah loo rakibay 43% qoysaska Maraykanka ah (Institute for Electronic Innovation, 2014).

DHAGAX DHIGAYA SHAQADA AASAASKA AHEE SMARTER GRID

Seattle waa hiigsade, farsamo heer sare leh iyo mid kamid ah magaalooyinka sida ugu degdega badan ukoraya gudaha wadanka. Waa muhiim inaan la socono baahideeda sida baaxada wayn u koraysa ee tamarka iyo inaan bixino adeeg hufan si aan ula kulano koritaankeeda. Advanced Metering waa aasaaska dhismaha nidaam koronto oo aad uhufan, kaasoo badanaa loogu yeero smart grid.

Nidaamkeena qaybinta korontada waxaa la dhisay bilowgii 1900 oo inta badan mitirada aan isticmaalno maanta waxyar ayay isbadaleen 100 sano ee lasoo dhaafay. Mitiradan waxay gaareen meeshii ugu danbaysay nolosha cimrigooda oo waxay ubaahanyihiin in la cusboonaysiiyo. Advanced Metering wuxuu naga caawin karaa inaan ubixino adeega korontada si aad uhufan iyo inaan macaamiisha siino awood wayn oo ay ku maamulaan isticmaalkooda korontada.

Mustaqbalka, Advanced Metering wuxuu caawin doonaa taageerida qalabaad cusub sida in lacagta horay loo sii bixiyo ama ogaysiisyada qoraalka ama iimaylka ah kuwasoo ku ogaysiinaya hdadii isticmaalkaaga korontada uu dhaafo jaangooyadaadii aad jaan goosatay. Ugu danbayntii, waxaad heli doontaa kharashka korontada aad isticmaashay bil kasta, halkii aad labadii biloodba mar heli lahayd.

Advanced Metering wuxuu:

- Kugu awood siin doonaa inaad samayso doorashooyin aad tamarta ku kaydiso
- Hormariso adeega macaamiisha
- Yarayso saamaynta uu ku yeelanayo bay'ada
- Hormariso hufnaanta City Light

MEELAHA LAGALA XARIIRO BARNAAMIJKA:
IIMAYL: SCL_Advanced_Metering@seattle.gov
WEB: seattle.gov/light/meters
TALEFOONKA: (206) 727-8777

Seattle City Light

Maarso 2016

ADVANCED METERING WUXUU KU BIXIN DOONA FAA'IIDOOYIN BADAN OO CUSUB. WUXUU:

Kugu awood siin doonaa inaad samayso doorashooyin aad tamarta ku kaydiso. Advanced Metering, waxaad awood uyeelan doontaa inaad maalin kasta si joogto ah u hesho halka uu marayo isticmaalkaaga korontada. Tani waxay kuu ogolaan kartaa inaad qaadato go'aano lagu badbaadiyo tamarta iyo lacagta kuwaasoo ku salaysan xog wanaagsan.

Hormariso adeega macaamiisha

- **Go'intaanka iyo soo noqoshada korontada:** Advanced Metering si toos ah ayuu City Light ugu tabinayaa kala go'a korontada, isagoo noo ogolaanaya inaan kuu jawaabno si deg deg ahna usoo celino korontadaada.
- **Xisaabinta kharashka korontada oo si wanaagsan usaxan:** Advanced Metering wuxuu si wayn u yarayn doonaa qiyaaska kharashka korontada kuwaasoo mararka qaarkood loo baahanyahay maanta marka mitir akhriyuhu aanu tagi karin guryaha si uu usoo qoro akhriska mitirka.

Yaraynta saamaynta bay'ada. Isticmaalkaaga korontada waxaa si toos ah loogu diri doonaa City Light, iyadoo la yaraynayo baahida loo qabo baabuurta wadada saaran si mitirka loosoo akhriyo. Waxaan baabi'in karnaa ilaa 72 ton naqaska kaarboonka (CO_2) sanadkiiba.

Kharshka barnaamijka waxaa lagu daray qiimaha aad bixiso; ma jiro kharashaad ka dheeraad ah oo la socda qiimahaas

HORMARINTA HUFNAANTA CITY LIGHT

Guud ahaan dhamaan shabakadeena qaybinta korontada, Advanced Metering wuxuu naga caawin doonaa inaan la socono kala go'a korontada, arrimaha la xariira danabka iyo dhibaatooyinka qalabka. Tani waxay ka caawin doontaa City Light inay si aad uhufan u howlgaliso nidaamkeeda, iyo oo ay qabato arrimaha ka hor inta aysan dhibaato noqon. Advanced Metering wuxuu awoodaa:

- Inuu inaga caawiyo inaan si wanaagsan ula socono uma maarayno shabkada qaybinta korontada.
- Inuu na siiyo waxyaabo badan oo amaan ah sida dareemayaasha lagu ogaan karo arrimaha kulaylka la xariira.
- Inuu yareeyo xatooyada tamarka asagoo digniin udiraya shirkada calaamada ugu horaysa ee isku dayga.

Dhamaan faa'iidooyinkaan dheeraadka ah waxay naga caawin doonaa inaan badbaadino wakhtiga iyo khayraadka, kuwaasoo naga caawin kara inaan yarayno kharashka oo uu kuu joogtayno.

ASAL RAACA BARJNAAMIJKA

Sida ku qeexan qorshaheena istraatiijiga ah, Seattle City Light waxay ku badali doontaa in ka badan 410,000 mitirada korontada kuwa cabirka hormarsan. Advanced Metering waa mid kamid ah hindisaha dhowrka istaraatiiji ee lagu dhisayo smarter grid oo faa'iido u leh macaamiisheena. Waxay casriyayn doontaa howlagalada City Light, hormarin doontaa adeegyada aan siino macaamiishena oo ay taageeri doontaa dadaalkeena lagu joogtaynayo shirkada ugu cagaaran wadankeena. Rakibida mitirku waxay qorshaysantahy inay bilaabato 2017.

Seattle City Light waxaa ka go'an in ay xad dhaafiso rajooyinka macaamiishayada oo soo saarto oo gudbiso degaan ahaan mid masuuliyad leh, badbaado leh, qiimo jaban iyo koronto la isku halayn karo.

Maarso 2016